DAQIIQADAHA RASMIGA EE IMTIXAANKA KAMA DAMBEYSTA EE GUDIGA KORMEERAHA ISKUULKA BOSTON; DR. TOMMY WELCH

Juun 24, 2022

Gudiga iskuulka Boston ayaa qabsaday shir kali kali ah kasoo udhacay si toos ah ee zoomka iyo Talefishinka caasimada Boston ee 24ta juun, 2022 waqtiga 5:30p.m. ee qeeybta gudiga iskuulka ee Bruce C. Bolling Municipal Building, 2300 Washington Street, Roxbury, MA 02119. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mid ka mid ah shayada hoos ku taxan, booqo www.bostonpublicschools.org/schoolcommittee, iimayl ugu dirfeedback@bostonpublicschools.org ama ka wac Xafiiska Guddida Dugsiyada Boston (617) 635-9014.

KA SOO QEEYBGALAYAASHA:

Xubnaha Guddiga Dugsiga ee soo xaadiray: Gudoomiyaha Jeri Robinson; Gudoomiye kuxigeenka Michael D. O'Neill; Stephen Alkins; Lorena Lopera; Rafaela Polanco Garcia; iyo Quoc Tran.

Xubnaha Guddiga Dugsiga ee Maqanaa: Brandon Cardet-Hernandez; iyo Student Representative Xyra Mercer.

DUKUMIINTIYADA LASOO BANDHIGAY

Midna.

FURITAANKA KULANKA

Gudoomiye Jeri Robinson ayaashirka furay hormuud ka noqdo ballan qaadka. Waxay kulankaas uga dhawaqday, in adeegyo turjumaadeed ee joogto ah laga heli karo sagaalka luuqadood ee waawayn ee BPS e dhanka Zoomka.

Ms. Robinson ayaa sharaxday raadinta gudiga kormeeraha in ay uxilsaaranyihin gudiga iskulka in ay qabtaan raadinta hogaamiyaha xigo ee Dugsiyada Dadweynaha ee Boston. Laga bilaabo Maarso, waxay bilaaben martigalino taxane ah ee kulamada dhagaysiga kalfadhiyada dadweynaha iyo shirarka daneeyayasha bulshada. Ra'yi celinta ardayda, qooysaska, barayaasha iyo lahawlgalayasha bulshada ayaa lagu daray shuruucda shaqada kormeeraha iyo ogeysinta raadinta sualaha imtixaanka xubnaha gudiga. Iyadoo lagu bilabayo 34 musharax, Guddiga raadinta ayaa ku soo koobay 8 qof intii lagu jiray Maajo iyo Juun, waxaana ay dhowr wareeg oo wareysi ah la yeesheen shaqsiyaadka. 17 kii Juun, gudiga raadinta ayaa qabtay wada tashigii ugu dambeeyay oo ay u codeeyeen in ay doortaan koox kama dambeys ah si ay u tixgaliyaan Guddiga iskuulka. Labo musharrax ayaa tan iyo markii ay ka baxeen howsha ka hor inta aan la billaabin wareysiyada dadweynaha. Labada musharax ee ugu dambeyay ayaa ah: Mary Skipper, Kormeeraha Somerville Public Schools, iyo Dr. Tommy Welch, kormeeraha dugsiyada dadweeynaha ee iskuulka gobolka 1 baad.

SOO KOOBIDA IMTIXAANKA

Dr. Welch Ayaa bixiyay furitaanka oraahda wadaagida khibradisa sida lawadagida barida labada luuqadood, kormeerida gobolka 1baad iyo waalidka hada BPS. Waxuu ka hadlay khibradisa xiritanka fursadaha iyo nusqaamaha guusha iyo xiriirkiisa qotada dheer iyo goa'aankisa Boston. Waxuu bogaadiyay faaidada aminaada dhismaha iyo qeexitaanka nafsadiisa sida labadaba sameyaha iyo fuliyaha.

Dr. Alkins ayaa waydiiyay Dr. Welch waxa ay yihiin xeeladaha gaarka ah ee uu u isticmaalay si uu u horumariyo natiijooyinka ardayda Madowga ah, natiijooyinka iyo tallaabooyinka uu isticmaalay, iyo sida uu wax uga qabtay cunsuriyadda nidaamka. Dr. Welch waxa uu ka hadlay la shaqaynta bulshada si loo diyaariyo iskuulo soo dhawayn leh oo u adeega dhammaan ardayda.

Iyadoo xustay in luqada looga hadlo BPS marka laga reebo Ingiriisi ay tahay Isbaanish, Marwo Lopera ayaa ku waydiisay su'aalaheeda Isbaanish iyo Ingiris labadaba. Waxay waydiisay Dr. Welch sida uu u diyaariyay iskaashi wanagsan ardayda, qoysaska, iyo xubnaha bulshada ee ku hadla luqada aan Ingiriisi ahayn. Mr. Welch ayaa markii hore ku jawaabay Isbaanishka, kadibna Ingiriiska. Wuxuu ka khudbadeyay khibradiisa la shaqaynta waalidiinta ee Koonfurta Bartamaha Los Angeles si uu ubilaabo iskuul loogu talagalay ardayda barata Ingiriska (ELLs).

Ms. Lopera ayaa waydiisay Dr. Welch in ay ka go'an tahay xaqiijinta isticmaalka luqadda hooyo ee bartayaasha luqadaha badan iyo kuwa naafada ah. Dr. Welch ayaa sheegay in uu geli doono wadada barnaamijyada kala duwan ee macalinka iyo barnaamijka shuruucda macalinka ee BPS si uu u shaqaaleysiiyo macalimiin dhalasho iyo luqad bo ku kala duwan.

Ms. Polanco Garcia ayaa waydiisay Dr. Welch falsafadiisa iyo sida ay uga go'an tahay in uu helo luuqadisa hooyo iyo aqrinta iyo qoraalka luuqada hooyo. Mr. Welch ayaa markii hore ku jawaabay Isbaanishka, kadibna Ingiriiska. Wuxuu buunbuuniyay oo uu carabka ku adkeeyay muhiimadda ay leedahay in la joogteeyo aqoonta luuqada hooyo, wuxuuna sheegay inay ka go’an tahay tababarka iyo taageeridda macallimiinta labada luuqadood ku hadla.

Mr. Tran ayaa waydiiyey Dr. Welch qeexiddiisa gaarka ah ee sinnaanta. Dr. Welch ayaa sheegay in sinnaantu ay micnaheedu tahay in arday kasta la siiyo waxa uu u baahan yahay si uu uga guulgaaro. Moowduuca baaritaaneed ee dhaqtar nimo ayaa ah qorsheyn isdaba joog ah ee dagmooyinka magaalada iyadoo loo fiirinayo ilaha sinaanta. Wuxuu ka hadlay sinnaanta marka laga fiiriyo natiijooyinka, fursadaha, go'aamada, iyo nidaamyada.

Ms. Robinson oo ka wakiil ah Mr. Cardet-Hernandez aya suaal waydiisay Dr. Welch iyadoo waydiienyso inuu keeno caddayn ku saabsan shaqadiisa dib u habaynta waxbarashada gaarka ah iyo cadaalada naafada. Dr. Welch waxa uu ka hadlay guulaha khibradiisa L.A. ee taageerta ardayda naafada ah.

Ms. Robinson oo ku hadleysa magaca Ms. Mercer aya sual waydisay Dr. Welch taasoo ku saabsan fikirkiisa ku aadan in ardaydu door muhiim ah ka qaataan waxbarashadooda waxayna waydiisay in intee la eg ayuu jecel yahay inuu la kulmo hogaamiyayaasha ardayda. Dr. Welch ayaa ka hadlay muhiimada ay leedahay midowga ardayda. Waxa uu goan ku gaaray in uu isu diyaariyo ardayda sidii kormeere.

Mr. O'Neill ayaa dib usoo xasuusatay in ay Dr. Welch kula booqatay iskuulada hal abuurka leh ee Los Angeles dhawr sano ka hor iyado ay qayb ka ahayd shaqada dib u habaynta dugsiga sare

ee BPS. Mr. O'Neill ayaa waydiiyay Dr. Welch arimo kusaabsan habka uu uwajaho maareeynta maaliyada, maalgelinta Gargaarka Degdegga ah ee Dugsiga Hoose iyo kan Sare (ESSER), iyo diyaarinta maalgelin khaas ah. Dr. Welch ayaa ka hadlay qaabka uu uwajahay kordhinta bixinta dhaqaalaha ESSER shanti sano ee lasoo dhafay. Waxuu ka hadlay muhiimada ay leedahay in maalgelinta gaarka ah loo maalgeliyo si bartilmaameed leh, oo hab saameyn leh.

Ms. Robinson ayaa waydiyay Dr. Welch habka uu uwajahayo in uu meeleeyo Fursadaha Xafiiska Daahsoon ee saamaynta ugu badan ee ugu qotada dheer ee miyir qabka ka hortagga ah iyo xiritaanka fursadaha iyo yareynta guusha ee ardayda la tirooyinkooda- oo ay kamid yihin ardayda midabada leh, bartayaasha luqada Ingiriiska, ardayda naafada ah, iyo ardayda ka soo jeeda reeraha dhaqaalahooda hooseyo sidoo kale lagu sharaxay guusha lasoo bandhigay. Mr. Welch ayaa ka hadlay balaarinta degmada ay ku samaysay fursadaha banaan ee xafiiska sannadyadii ugu dambeyay. Wuxuu tusaaleyay habka qorsheynta sinaanta jinsiyada iyo kalagadinta sinnaanta si ay cadeyn ugu noqoto sinaanta jinsiyada ee degmada iyo shaqada ka hortagga cunsuriyadda. Waxuu sheegay in si adag loo maareeyay lacagta deeqaha ah ee lagu taageerayo ka qaybgalka ardayda ELL iyo waxbarashada gaarka ah ee dardargelinta akadeemiyada.

Dr. Alkins waxay waydisay Dr. Welch qaabka uu dib ugu soo celin lahaa kalsoonida bulshada BPS. Dr. Welch ayaa sheegay in uu ku dari doono codadka dhamaan, u qayb kanoqon doono wadahadalka dhibaatooyinka, oo uu ka caawin doono qoysaska inay fahmaan sababaha ay u qalqaalinayan kamid noqoshada hogaamiyayaasha degmada. Waxuu carabka ku adkeeyay muhiimada ay ledahay wada xariirka iyo hirgelinta.

Ms. Lopera ayaa wadisay Dr. Welch hab nocee ah ayu uga goan gari doona fikirka kusaabsan dakhli qeybsiga, maskax kuhaynta isbeddellada ku xiran hoos u dhaca diiwaangelinta, cabsida carqaladaynta, iyo isticmaalka degitaanka jilicsan. Dr. Welch ayaa ka hadlay muhiimada ay ledahay ahanshaha qof firfircoon. Ms. Lopera ayaa waydiisay Dr. Welch sual kusaabsan khibradiisa u adeegida ardada kabaxsan. Dr. Welch waxa uu ka hadlay khibradisa isagoo taageeraya waxbarasho ka duwan ee BPS,isagoo sheey in uu baaray xogta si uu usiiyo arday da taageerada uu beegsanayo.

Ms. Polanco Garcia ayaa waydiyay Dr. Welch qaabka uu u wajahayo kusoo darida, sharciyeynta iyo sii haynta macalimiinta iyo shaqaalaha awooda u leh in ay wax ku dhigaan ugu yaraan laba luqadood, sidoo kale caqabadaha iyo guulaha intaba. Mr. Welch ayaa markii hore ku jawaabay Isbaanishka, kadibna Ingiriiska. Waxuu kahadlay khibradisa kala duwananshaha kudarida, shaqaalaha labada luuqadood ee East Boston.

Mr. Tran ayaa waydiiyay Dr. Welch waxa ay noqon doonaan saddexdiisa ugu mudnaanta badane ee saddexda biloodee ugu horreeysa ee kormeeraha. Dr. Welch ayaa sheegay in uu mudnaan siindoono u diyaar garowga si habsami leh sanad dugsiyeedka cusub, samaynta maalgelinta ESSER, iyo dhisida koox hogaamineed oo awood leh.

Ms. Robinson ayaa sual waydisay Dr. Welch iyadoo wakiil ka ah Mr. Cardet-Hernandez taso ah habka uu ku xoojinayo dhaqanka iskuulka, dhismmaha iyo dib udhisida amaano ee qooysaska, iyo inaad si degdeg ah wax uga qabato cagajuglaynta. Dr. Welch ayaa shegay BPS in ay u baahan yihiin in ay si balaaran ula xariiraan dhaqaalaha loo heli karo qooyska. Waxa uu carrabka ku adkeeyay muhiimada ay leedahay warbixinta hore iyo shuruucda hirgelinta.

Ms. Robinson ayaa waydiisay suaal Dr. Welch ayadoo wakiil ka ah Ms. Mercer taaso ah sida uu u taageeri doono hogaaminta ardayda, khaas ahaan, Golaha La talinta Ardayda Boston (BSAC), iyo talaabooyinka uu qaadi doono kadib marka ay ardaydu mudaaharaadan ama ay mudaaharad sameyan.

Dr. Welch ayaa ka hadlay muhiimadda ay leedahay in la xaqiijiyo badbaadada ardayda, kuwa mudaaharaadaya, waxaanu cadeynay inay ka go'an tahay kor u qaadista codka ardayda.

Mr. O'Neill ayaa waydiyay Dr. Welch haddii uu ku raco in degmadu ay masuul ka tahay xaqiijinta guusha ardayga ee ka dambeeya qalinjabinta dugsiga sare iyo waxa uu ka bedeli doono. Dr. Welch ayaa sheegay in Madison Park Technical Vocational High School uu hada yahay mid aan laga faa'iidaysan oo hadana leh faaido badan. waxu shegay inuu sahamin doono furitaanka barnaamijka waxbarashada dadka waaweyn ee fiidkii. Mr. O'Neill ayaa kawareystay Dr. Welch fikirkiisa ku saabsan dugsiyada bulshada hub. Dr. Welch ayaa in uu jecelyahay in kobciyo iskuulada bulshada ee hub,taaso bixiso adeegyada iskuxirida ardayda iyo qoysaska. Wuxuu la wadaagay khibradahiisa ku saabsan isbedelka Umana Academy ee East Boston oo loo beddelay iskuulka bulshada e hub.

Ms. Robinson ayaa waydiiyay Dr. Welch sida uu u naqshadeyn doono xafiiska dhexe kaaso isku xiro oona bixiya taageero tayo leh iyo adeegyo iskuulada kasiman ardayda natiijooyinkada. Dr. Welch ayaa shegay inu samayn doono dashboard-ka xogta si uu ula socdo qaybaha waaweyn ee shaqada si uu la wadaago qaababka ugu wanaagsan.

Ms. Robinson ayaa casumtay Dr.Welch si uu uwaydiyo suaal bulshada. Dr. Welch ayaa waydiiyey xubnaha Guddiga sida ay u arkaan la xisaabtanka kormeeraha xiga. Mr. O'Neill ayaa sharaxay in qiimaynta waxqabadka sanadlaha ah ee guddiga kormeeraha uu ku kala duwan yahay sanadka kowaad iyo sanadaha kale. Wuxuu sheegay in Guddigu ay u badan tahay inay si dhow u fiirin doonaan qorshaha 100-ka maalmood ee kormeeraha xiga, iyo sidoo kale horumarka laga gaaray dhismaha kooxda, dhisida kalsoonida iyo hufnaanta, furitaanka iskuulada, iyo la shaqeynta Waaxda waxbarashada dhexe iyo sare ee MA(DESE). Ms. Robinson waxay ka hadashay muhiimadda ay leedahay wada xiriirka joogtada ah ee ka dhaxeeya kormeeraha iyo Guddiga. Dr. Welch ayaa sheegay in kormeere ahaan, uu si joogto ah u bixin doono daah furnaan, cabbirro la xariira ardayda. Waxuu sheegay in uu doonayo in si guud loogula xisaabtamo natiijada ardayda. Ms. Robinson ayaa sheegtay in DESE ay u badan tahay inay u baahnan doonto warbixin joogto ah oo Guddigu si joogto ah u baari doono yoolalka iyo qimeynta.

Dr. Welch ayaa bixiyay oraahda xariirka, isaga oo daliishanaya khibradiisa sida macalin la aqoonsaday, bartayaasha luqadda Isbaanishka, maareyaha nidaamka, iyo waalidka hadda ee BPS. Haddii loo doorto kormeere, wuxuu yiri waxan sheeg in uu diyaar u yahay "inuu waxbadan qaban doono."

KA XIRIDA

Ms. Robinsonku ayaa ku casumay daawadayaasha inay wax badan ka ogaadaan musharixiinta oo ay u fiirsadan hadaladooda idil kana fiirsadan[bostonpublicschools.org/supt-search](bostonpublicschools.org/supt-search). Dadka waxaa lagu dhiirigelinayaa inay iimayl ugu so gudbiyaan jawaab celintooda gudigasuperintendentsearch@bostonpublicschools.org. Guddigu waxay u codayn doonaan doorashada musharraxa kama dambaysta ah shirka dhacayo 29 ka Juun xiliga marku yahay 5p.m.

Waxaa la ansixiyay-Kudhawaad 7:40 p.m. Guddigu waxay cod aqlabiyad ah ku ansixiyeen mooshin dib loogu dhigayo shirka iyadoo la isku raacay.

Attest:

Elizabeth Sullivan
Xoghayaha fulinta